Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay qasciga oo ah in Timaha qaar la xiiro qaarna la daayo

Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiye waxaa laga wariyey: Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu reebay qasciga oo ah in Timaha qaar la xiiro qaarna la daayo.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Wuxuu reebay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in timaha madaxa qaybna laxiiro qaybna la daayo. Reebiduna waa guud ahaan ragga yaryar iyo kuwa wawaynba, Dumarkase uma banaana inay timaha Madaxooda xiiraan.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/8914

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY
لجنة الدعوة الإلكترونية
EDC E-Da'wah Committee